

2020

Taariikhaha doorashada

Xabsi in laga soo Codeeyo 2020

17-ka Jannaayo

Codbixinta horumariska ah ayaa bilaabaneysa

11-ka Feberaayo

Diiwaangelintu waxay dhammaaneysaa 5-ta galabnimo

3-da Maajo

Maalinta magacaabista murashaxa madaxweynaha

furidda goobaha codeynta 7-da subaxnimo ilaa 8-da fiidnimo**

26-ka Juun

Codbixinta horumariska ah ayaa bilaabaneysa

21-ka Julaay

Diiwaangelintu waxay dhammaaneysaa 5-ta galabnimo

11-ka Ogoosto

Maalinta doorashada hordhaca ah

furidda goobaha codeynta 7-da subaxnimo ilaa 8-da fiidnimo**

18-ka Sebtembar

Codbixinta horumariska ah ayaa bilaabaneysa

13-ka Oktoobar

Diiwaangelintu waxay dhammaaneysaa 5-ta galabnimo

3-da Nofeembar

Maalinta doorashooyinka guud

furidda goobaha codeynta 7-da subaxnimo ilaa 8-da fiidnimo**

** Waraaqaha codeynta hormariska ah waa in boostada lagu soo diro 3-da Nofeembar si loo helo 10-ka Nofeembar.

Dambi hore oo qoran oo aad mar hore sameysay MA saameyn karo inaad ka codeeyso gobolka Minnesota HADDII aadan wakhtiga xaadirka ah xabsi ugu jirin dambi lagugu helay, sida baroobeysan, sii-deyn shuruud lah ama sii-deyn ah shuruud oo kor lagaa ogaanayo.

Sarkaalka waaxda xabsiyada ee kuu xilsaaran weydiiso codeynta horumariska. Xafiiska Doorashada Degmada Hennepin ayaa markaas guriga kuugu soo diri doona waraaqda codbixinta horumariska ah. Waraaqaha codbixinta waa in dib loogu soo diraa Xafiiska Doorashooyinka marka la buuxiyo ka dib.



Xaq ma u leeyahay?

Si aad qeyb uga noqoto doorashada, waxaa shuruud ah:

1. Inaad tahay Muwaadin Mareykan ah;
2. Inaad tahay ugu yaraan 18 jir maalinta doorashada;
3. Inaad deggan tahay Minnesota 20 maalmood;
4. In aad soo dhammeysatay gebi ahaan xukun kasta oo dambi ah Maalinta Doorashada;
5. INAYSAN maxkamad sharci ah kugu xukumin in masuul kagaa yahay.

Ogsoonow: Haddii aad xabsi ku jirto Maalinta Doorashada, oo aan weli lagu xukumin, balse aad soo dhammeysatay xukunka faldambiyeedyo hore (haddiiba ay sidaas jirto), waxaa lagaa rabaa inaad ka soo baxdo shuruudda 4-aad.

Marka aadan hubin xaalkaaga sharci ahaaneed?

Mararka qaarkood waxaa lagu jahwareeraa kala-duwanaanshaha u dhaxeeya eedeymo ah dembi weyn iyo xukunka dembiga. Kala hadal qareen si aad wax uga ogaato xaalkaaga sharciga ah.

Mar hore miyaad is diiwaan gelisay?

Haddii aad is diiwaan gelisay, oo aysan magacaaga iyo cinwaankaagu waxba iska beddelin, waxaad la xiriirtaa sarkaalka xabsiga ee adiga kaa war haya oo weydiiso codsiga Codbixinta Horumariska ah. Marka ay Xafiiska Doorashooyinku kaa helaan codisga, waraaqda codbixinta hormariska ah ayaa boostada laguugu soo dirayaa. Buuxi waraaqda codbixinta oo dib noogu soo dir boostada.

Miyaadan weli is diiwaan gelin?

Waa inaad sidoo kale la xirirto sarkaalka xabsiga ee adiga kaa war haya oo weydiiso Codbixinta Horumariska ah. Marka ay Xafiiska Doorashooyinku kaa helaan codisga, waraaqda codbixinta hormariska ah ayaa boostada laguugu soo dirayaa iyadoo ay la socdaan habka aad isu diiwaan gelineyso.

Waxaad u baahan tahay cinwaan joogto ah (cinwaan meel xarun ah lama oggola) si aad si fiican isugu diiwaan geliso. Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad qorto lambarkaaga Leysanka Baabuurka, ama Lambarka kaarka Aqoonsiga Gobolka, ama Sagaalkaaga Lambar.

Ma codeyn karaa...

Haddii la igu soo oogay ama la igu xukumay dambi yar ama dambi xoogaa yar weyn?

HAA

Haddii aan ku jiro xabsi, laakiin aan hadda xukunkeygu ahayn dambi aad u weyn?

HAA

Haddii la igu soo oogay dambi aad u weyn, laakiin aan weli la i xukumin?

HAA

Haddii dambi aan qirtay aan la ii qorin oo ciqaabtana la ii fududeeyo?

HAA

Haddii aan soo dhammeysto gebi ahaan xukun ah dembi weyn ee gobol kale?

HAA

Haddii aan soo dhammeystay gebi ahaan xukunka dambi weyn, sida baroobeysan ama cafis shuruud ku xiran?

HAA

Haddii aan hadda xabsi ugu jiro dembi weyn, sida baroobeysan ama cafis shuruud ku xiran?

MAYA

Haddii la igala noqdo dambi aan qirtay oo aan la ii qorin oo ciqaabtana la iga fududeeyey oo hadda xabsi la i dhigay?

MAYA